

Caawimada Qaraabada

Adeegyada Bulshada ee dawlada hoose ee Bollnäs

DIRE
Dawlada hoose ee Bollnäs
Maamulka Bulshada
Tilifoonka: 0278-257 15
limayl: anhorigstod@bollnas.se
Ciwaanka Booqashada: Våggatan 11
Ciwaanka boostada 821 42 Bollnäs
www.bollnas.se/anhorigstod



Caawimada qaraabada ee Bollnäs

Caawimada qaraabada waxa lagu muujiyaa dhowr qorshe oo loola jeedo in loogu fududeeyo kuwa leh qaraabo dhow, oo xanuunsanaya, naafo ah, xadgudub helay, dhibaatooyin xiriir leh ama itaal daro da'eed, u baahan caawimo nolosha maalinkasta. Waxaad dooran kartaa inaan lagu shaacin madaamoo aan leenahay waajibaad qarsoodi ah. Caawimada waxa loogu talo galay dhamaan qaraabada kumana xidhna da'da. Intaasi waxa dheer, waxba loogama baahna ka qeybqaadashada Adeegyada Bulshada si loo awoodo in la helo caawimo.

Xogta xiriirka

Lambarka tilifoonka caawimada qaraabada waa **0278- 257 15**.

Ciwaanka iimaylku waa : anhorigstod@bollnas.se

Nasashada

Haddii qaraabo ahaan, aad u baahan tahay inaad qaadatid wakhtigaaga, waxaan ku siin karaa mudo nasasho.

Mudadan nasashadu waxay ka dhici kartaa gurigaaga ama meel badqabta oo dhismayaasheena Våggatan 11 ah. Mudadani waa bilaash waxayna noqon kartaa ilaa 30 saac bishiiba. Haddii aad dooratid inaad ku qaadatid mudada nasashadan meel badqabta oo dhismayaasheena dhexdeeda ah; kharashka cuntada waa la bixin doonaa.

Daryeelka maalintii iyo hawlaha maalinlaha

Daryeelka maalintii iyo hawlaha maalinlaha waxay muujiyaan fursad nasasho, iyadoo lala qaadanayo maalin firfirxoon oo macno leh dadka kale. Tani waxay leedahay natiijooyin wanaagsan oo dhanka dhaqancelinta waxayna diirada ku guulaysiga maalin farxad leh oo wanaagsan. Xarunta daryeelka maalintii waxay ku taal dhismayaashena, lagu magacaabo Våggatan 11.

Kooxaha qaraabada

Ujeedada kooxdani waa in lala kulmo qaraabada kale ee ku jira xaalado la mida. Tani waa fursad lagula wadaagyo khibrado, warwar iyo farxad qaraabada kale. In la wada sameeyo waxyaabo, la wada barto wax oo la helo macluumaad cusub

Joogista mudada gaaban ee soo noqnoqota

TheUjeedada joogista mudada gaaban ee soo noqnoqota waa in loo fududeeyo qofku inuu joogo guriga u naxariisto qaraabo dhow. Meelahaasi joogista mudada gaaban waxa laga helayaa Ängslunda. Lacala haddii aad rabtid inaad codsatid joogis mudo gaaban oo soo noqnoqnaysa, fadlan kala xiriir Sarkaalka Kaalmada 0278-250 00

Lataliyaha Tanja Masalin wuxuu ku siin karaa

- talo iyo caawimo arimaha la xiriira qaraabada ah
- wadasheekaysi gaara oo aad kala hadli kartid fikirkaaga iyo dareenkaaga si nabdoon oo degan.
- booqasho guri

Ka wac lataliyaha 0278-257 16

Kalkaalisada xasuu-darada maskaxda, Lisa Karlsson, waxay bixin kartaa

- latalin
- wadasheekaysiyo gaara
- si loo sameeyo booqashooyin guri ama loo helo booqashooyin guri markii la codsado
- si loo dhexdhaxaadiyo xiriirka daryeel caafimaad bixiyayaasha

Ka wac kalkaalisada xasuu-darada maskaxda at 0278-253 08